

Ma ogtahay in daaweynta ay
bixiso GP-ga **ay lacag la'aan**
tahay dhammaan?



**Iska diiwaangeli
Dhakhtarka guud maanta!**

Miyaad ku noosahay gudaha Leicester, Leicestershire & Rutland oo mana haysatid dhakhtar maxali ah?



Waxaad ka heli kartaa daryeel caafimaad iyo daaweyn Dhakhtarka guud. Tani waxay bilaash utahay dadkoo dhan. Dhaqtarka guud Waa dhakhtar qoys oo deegaanka ah. Si aad daryeel iyo daaweyn uga hesho Dhaqtarka guud waa inaad iska diiwaangelisaa xarunta Dhaqtarkaaga guud.



Waxa kale oo aad daryeel ka heli kartaa dadka kale ee ka shaqeeya xarunta Dhaqtarka guud, sida kalkaaliiyayaasha caafimaadka iyo farmashiistayaasha. Waad iska qori kartaa xarun kasta oo Dhaqtarka guud ah oo ku taala aaggaaga illaa inta ay boos uga helayaan bukaanada cusub.



Weydiiso inaad isdiiwaangaliso adigoo la xiriiraya soo dhaweynta Dhaqtarka guud ama Sarkaalka Diiwaangelinta Dhaqtarka guud. Soo dhaweeyaha Dhaqtarka guud ayaa ku weydiin doonta inaad buuxiso foomka diiwaangelinta. Weydiiso caawimaad ee buuxinta foomka haddii loo baahdo kuna soo celi xarunta soo dhaweynta dhakhtarka guud. Markii aad iska diiwaangaliso rugta dhakhtarka guud ee deegaankaga waxay ilaalil doonaan daryeelkaaga caafimaad ee kuu socda.

Faa'iidooyinka diiwaangelinta



Markaad isdiiwaangaliso, waxaad awoodi doontaa inaad adeegsatid adeegyo badan oo ku daaweyn doona markaad dareento inaad xanuunsan tahay oo kaa caawin doona inaad hesho arrimo caafimaad.



Helitaanka daryeelka Dhaqtarka guud waa hab muhiim ah oo kaa caawinaya inaad go'aan ka gaarto caafimaadkaaga oo aad hesho daaweynta kugu habboon.

Haddii aad daryeel gaar ah uga baahan tahay isbitaal ama adeegyo kale, rugtaada Dhaqtarka guud ayaa kaa caawin doonta tan inay dhacdo.



Dhaqtarkaaga guud wuxuu hubin doonaa in adiga iyo qoyskaaga aad heshaan cirbadahaaga tallaaladaada. Kuwaasi waxay kaa difaaci doonaan infekshannada qaarkood iyo cudurrada.

Iska diiwaangelinta xarunta Dhaqtarka guud ayaa kaa caawin doonta inaad heshotallaalka covid.

Ma u baahan tahay caddeyn halka aad ku nooshahay?



Way ku caawinaysaa inaad haysato caddeyn halka aad ku nooshahay, laakiin haddii aadan haysan dukumiintiyo muujinaya meesha aad ku nooshahay, weli waad iska diiwaangelin kartaa rugta Dhaqtarka guud.



Tani waa isku mid xitaa haddii aad tahay magangalyo-door, qaxooti, bukaan-jiif hoy ah ama boeqde dibadeed ah, inaad UK ku joogto iyo haddii kaleba.

Ma u baahan tahay foom aqoonsi ah?



Uma **baahnid** inaad muujiso aqoonsi, heerka socdaalka ama lambarka NHS marka aad iska diiwaangelineyo Dhaqtarka guud, laakiin waa waxtar in la sameeyo.

Way ku caawinaysaa haddii aad siin karto ugu yaraan mid ka mid ah dukumintiyada hoose markaad iska diiwaangelineyo Dhaqtarka guud:



- Baasaboor
- Shahaadada dhalashada
- Oggolaanshaha daganaanshaha diiwaangelinta ee habka casriga
- Dukumentiga safarka
- Shahaadada HC2
- Kaarka ARC
- Biilasha korontada

Sida laiskaga diiwaangeliyo rugta Dhaqtarka guud



Istdiiwaangeli sida ugu dhakhsaha badan ee aad awoodid markii aad timaado England ama meel cusub si aad u aragto Dhaqtarka guud markaad xanuu santahay.

Raadi Dhaqtarka guud ku habboon baahiyahaaga. Waad raadin kartaa howlaha Dhaqtarka guud si aad u aragto waxa ay bixiyaan.

Si aad u hesho Dhaqtarka guud kuu dhow booqo:
www.nhs.uk/service-search/find-a-GP

Waxaad la xirrii kartaa xarunta Dhaqtarkaaga guud ama Saraakiisheena Diiwaangelinta Dhaqtarka guud. Waxay kaa caawin doonaan wixii su'aalo ah ee ku saabsan sida la iska diiwaangeliyo rugta Dhaqtarka guud iyo sida loo helo daryeel caafimaad markii aad dareento caafimaad darro.



SCAN ME

Wixii macluumaaad dheeraad ah fadlan booqo

[www.leicesterccg.nhs.uk/
you-and-your-gp-practice](http://www.leicesterccg.nhs.uk/you-and-your-gp-practice)

AMA La xiriir Saraakiisha Diiwaangalinta ee xarunta Dhaqtarkaaga guud

Prakash Patel

07824 821101

Prakash.Patel10@nhs.net